MINISTRY OF EDUCATION
Te Tāhuhu o te Mātauranga

Macluumaad kusaabsan NCEA oo waalidiinta loogu talogalay

Waa maxay NCEA?
NCEA waa aqoonsiga ugu muhiimsan ee ay qaataan ardada dugsiyada sare ee New Zealand.

NCEA waxay u taagan tahay ama looga jeedaa Shahaadada Qaran ee Hanashada Waxbarashada waxayna ka kooban tahay saddex heer: 1, 2 iyo 3 oo ay ardadu kuqaataan fasalka 11aad ilaa kan 13aad.

Waa maxay sababta ilmahaygu ugu hawlgelayo qaadashada NCEA?
NCEA waxaa loogu talo galay ardayda oo dhan – waxaa laga yaabaa inay qaarkood usocdaan jaamacad, qaar kalena qorshaysanayaan barashada xirfad shaqo, iyadoo weliba qaar kalena ay dhici karto inay doonayaan aqoon kororsiga farsamo gacmeed si ay toos shaqo ugu raadsadaan markay dugsiga ka baxaan.
Waa muhiim in ilmahaagu doorto maadooyinka NCEA ee ku habboon mihnada shaqo ee u qorshaysan mustaqbalka.

Sidee ayuu ilmahaygu kuheli karaa NCEA?
Waayihii hore waxay ardaydu dhammaadka sannad dugsiyeedka u fadhiisan jereen hal imtixaan oo saddex saacadood ah si loo ogaado waxay kabarteen maaddadaas.

Inkastoo NCEA-du leedahay imtixaanno qaran oo muhiim ah oo la qaado dhammaadka sannad walba (loona yaqaan qiimaynta dibedda), haddana ilmahaaga waxaa sidoo kale la imtixaamayaa, ama la qiimaynayaa, sannadka oo dhan – taas waxaa loo yaqaan qiimeynta gudaha waayo waxay ka dhacaysaa iskuulka dhexdiisa.

Maadooyinka NCEA waxaa loo kala qaadayaa ‘halbeegyo’(achievement standards and unit standards). Kuwani waa dhammaan waxyaabaha larabo inay ardaydu garanayaan ama qaban karayaan.

Halbeeg (standard) walba wuxuu ku qiimaysan yahay dhibco (buundooyin) – dhibcahaasina waxay qayb ka yihiin aqoonsiga ugu dambayn ardaygu qaadanayo. Maaddo sida luuqadda Ingiriiska ee heerka 1aad waxaa laga yaabaa inay ka kooban tahay inta udhaxaysa afar ilaa toban halbeeg kuwaasoo wadarta qiimohoodu dhan yahay 20 dhibcood ama wax kabadan.

Maadada Af-ingiriiska meeshay ardaydu ufadhiisan lahaayeen hal imtixaan oo saddex saacadood ah, koorasku wuxuu ka koobnaan karaa halbeeg la xidhiidha qoraalka aan rasmiga ahayn(sida codsi shaqo) iyo mid kale oo ku saabsan curinta iyo jeedinta khudbadaha. Qaar ka mid ah halbeegyadaas waxaa lagu qiimayn doonaa imtixaan laqaadayo sannadka dhammaadkiisa, qaarkalena waxay qiimayntoodu dhacaysaa inta sannad dugsiyeedku socdo.

Ardaydu waxay kororsan karaan dhibcaha inta sannad dugsiyeedku socdo – amaba xataa muddo sannad kor udhaafsiisan – dhibcaha ay helaanna waa kuwo weligood kaydka ugu jiraya. Ardaydu waxay raadraac kusamayn karaan tirada dhibcaha ay ururSadeen intay waxbarashada ku jiraan.

Maxaa loo baahan yahay si loo hanto NCEA?
Heer kasta ee aqoonsiga NCEA, waxaa ardayda looga baahan yahay inay hantaan 80 dhibcood. Kuwaasoo sidoo kale loo baahan yahay inay kujiraan, qaar kamid ah halbeegyada akhriska, qorista iyo xisaabta ah.

Heerka 1aad:	80 dhibcood ee heerka 1aad ama wixii kasarreeya, oo ay kujiraan 10 dhibcood oo akhriska iyo qoraalka iyo 10 buundo oo xisaabta ah.

Heerka 2aad:	80 dhibcood – oo ugu yaraan 60 kamid ahi yihiin heerka 2aad iyo wixii ka sarreeya, 20ka dhibcood oo kalena waxay ka imaan karaan heer kasta. Sidoo kale waa in la buuxiyo shuruudaha akhriska, qorista iyo xisaabta ee heerka 1aad.
Heerka 3aad:	80 dhibcood – oo ugu yaraan 60 kamid ahi yihiin heerka 3aad ama wixii kasarreeya, 20 kalena ka imanayaan heerka 2aad ama wixii ka sarreeya.

Faham natiijada ilmahaaga

Marka ilmahaagu helo natiijadiisa, waxaad ogaan doontaa inta dhibcood ee uu haysto – hayeeshee, natiijada ilmahaagu waxay kuu sheegaysaa akhbaar dhaafsiisan baasitaanka heerka 1aad ee NCEA.
Natiijada ilmahaagu waxay muujinaysaa natiijada waxa uu ka helay halbeeg walba– iyadoo midkasta ku hor qoran yahay xarfaha soosocda midkood– **N, A, M, E**. iyadoo **N** u taagan tahay magudbin (ma baasin), **A** = wuu baasay, **M =** wuxuu ku baasay si wacan, iyo **E=** wuxuu ku baasay si aad u fiican. Waxay kuu sheegayaan sida wanaagsan ee uu ugu baasay halbeegaas.

Higso meel sare

Maanka kuhay in 80 dhibcood ay tahay waxa ugu yar. Ku boorri ilmahaagu inuu tiigsado 80 dhibcood wax kabadan. Hadday keenaan ugu yaraan 50 dhibcahaas kamid ah wacan (M) ama aad u fiican (E) – waxaa shahaadadooda lagu muujinayaa wacan ama aad u fiican – Taas waxaa loo yaqaan ayidaad shahaado.
Taasi waxay caawinaysaa markay natiijooyinkooda dadka tusayaan markay iskuulka kabaxaan dabadeed– si ay shaqo u helaan ama ay ugu sahlanaato helitaanka maadada jaamacadda ee ay door bidayaan.

Sidee ayay u dooranayaan maadooyinkooda ?

Waxaa muhiim ah in labilaabo qorshaynta iyo kafiirsashada maadooyinka ku habboon inay qaataan NCEA intay ku jiraan fasalka 9aad iyo kan 10aad. Haddii ilmahaagu maanka kuhayo mihnad gaar ah, waxaa muhiim ah inuu ogaado maadooyinka looga baahan yahay inuu qaato iyadoo lala kaashanayo lataliyaasha mihnadaha ee iskuulka, hormuudyada ama macallimiinta.

Maxaa loo baahan yahay si loo oofiyo shuruudaha Gelista Jaamacadaha?

Si loogu guulaysto Gelitaanka Jaamacadaha waxaa ardayda looga baahan yahay inay qaataan shahaadada heerka 3aad ee NCEA iyo inay mid walba ka helaan 14 dhibcood saddex maaddo oo kujira liiska maadooyinka la aqoonsan yahay. Sidoo kale waa inay oofiyaan shuruudaha akhriska, qorista iyo xisaabta. Shuruudahaasi waa inta ugu yar ee looga baahan yahay gelitaanka jaamacadaha New Zealand. Jaamacadaha badankooda iyo machadyada waxbarashada heerka sare waxay leeyihiin shuruudo dheeraad ah, oo kuxidhan gaar ahaan qaadashada maadooyinka qaarkood.

Waa maxay aqoonsiyada kale ee ilmahaygu beegsan karo intuu iskuulka dhiganayo?

Waxaa suurtowda in iskuulka ilmahaagu bixiyo shahaadooyin kale oo waddanka laga aqoonsan yahay iyo NCEAba. Kuwaas waxaa kamid ah Shahaadoodyinka: Maamulka Ganacsiga, xirfadaha Kumbiyuutarka, Diyaafadaynta (Adeegyada cuntada iyo cabitaanka), Injineernimada Farsamda Gananta , Socdaalka iyo Dalxiiska iyo NZCEL (Shahaadada New Zealand ee barashada Af Ingiriiska). Iskuulkaaga weydii shahaadooyinka waddanka laga aqoonsan yahay ee halkaas laga bixiyo oo kusaabsan qaybaha ilmahaagu danaynayaan.

Dhibcaha laga helo hawlqabadka qaarkiis waxaa dhici karta inay qayb kanoqdaan dhowr aqoonsi; wadarta dhibcohoo dhammina waxay qayb kayihiin NCEA. Aqoonsiyada waxbarasho qaarkood waxaa lagu dhammaystiri karaa iskuulka, qaar kalena waxaa suuragal ah in ilmahaagu iskuulka ku bilaabo balse ku dhammaytiro goobtiisa shaqada ama hay'ad waxbarasho sare(machad ama jaamacad).

Talooyin waalidiinta loo jeedinayo

- Weydii ilmahaaga (wiil ama gabadh kuu yahayba) siday ushaqayso NCEA – ardayda badankoodu si wacan ayay ufahamsan yihiin.
- Ufidi gacan qabasho (sida: waqti, meel, taageero shaqada guriga) si aad ilmahaaga uga caawiso inay wax daraaseeyaan – xusuusnow in sannadka oodhan waxbarashadooda qiimayn lagu samaynayo, ee ayan arrintu keliya ku koobnayn imtixaanaadka ugu dambeeya.
- Markaad kacaawinayso ilmahaaga inay doortaan maadooyinka, ku dhiirri geli inay qaataan heerka 1aad maadooyin guud, balse ay bilaabaan inay kasii fekeraan dhinacyada ay diiradda saari lahaayeen heerarka 2aad iyo 3aad ee la xidhiidha waxbarashadooda mustaqbalka.
- Ku boorri ilmahaaga inay beegsadaan helitaanka buundooyin sare – (M) wacan iyo (E) aad u fiican. Tani waxay wanaajinaysaa fursadahooda shaqo, ama kuwa ay ku geli karaan maadooyinkay door bidayaan.
- Haddii ilmahaagu maanka kuhayo mihnad ama kooras waxbarasho heerka sare ah, hubi halbeegyada heerka 2aad iyo 3aad ee looga baahan yahay gelitaanka jaamacadda ama machadyada kale ee waxbarashada heerka sare ee ay doonayaan inay waxkabartaan.
- Kala tasho iskuulka iyo macallimiinta ilmahaaga horumarka ay samanaynayaan. Sidoo kale iskuullada badankoodu waxay qabtaan kulammo waxtar leh oo kusaabsan xogta aqoonsiyada oo waalidiinta loogu talo galay.
- Eeg macluumaadka NCEA ee bogga NZQA: www.nzqa.govt.nz/ncea